



Ogaysiis muhiim ah!

Ururka Islaamiga ah ee Linköping (IFIL) wuxuu mudnaanta siiyaa caafimaadka xubnaheeda iyo muslimiinta kalee masaajidka ku soo dugadda, wuxuuna si dhow ula socdaa horumarka cudurka 'covid-19 virus'.

Kadib go'aankii dowladda usbuucii la soo dhaafay ee mamnuucay shirarka in kabadan 500 oo kaqeybgal ah si loo xakamayo cudurka coronavirus ayaa Guddiga masjidka waxay go'aan sadeen inay joojiyaan salaadahii jimcaha iyo dugsiyada kala duwan ee waxbarashada laga bilaabo jimcaha 13/3/2020 ilaa amar dambe, laakiin lagu sii dugada shanta salaadood ee faralka ah sidii caadiga ahayd. Guddiga ayaa sidoo kale ku boorriyay xubnaha iyo dadka kalee muslimiinta ah in ay gurigooda joogaan haddii ay qabaan astaamo hergab sida qufac ama qandho, haddaa haddii ay yihiin astaamaha kuwa fudud.

Nasiib darrose, Guddidu waxay arkeen in dhammaan booqdeyaashu ama muslimiinta ku dugadda masaajidka aysan u hoggaansamin soo-jeedinta inay guriga joogaan haddii aay isku arkaan astaamo.

Sidaa darteed guddiga masjidka waxay go'aan sadeen arimihaan soo socda:

1. In la Xirro masaajidka laga bilaabo Khamiista, Maarso 19, 2020 illaa go'aan cusub laga gaarayo.
2. Arimaha maamulka masaajidka u sii socdaan sidii caadiga ahayd.
3. Haddii loo baahdo adeegyo kale, sida Nikaax, duugis/aas ama wax kale lala xiriira guddoomiyaha guddiga.

Illaahay ha inoo fududeeyo dhamaanteen hana inaga badbaadiyo masiibada cudurkan

Ururka Islaamka ee Linköping (IFIL)

Guddoomiyaha guddiga Maxamed Cige

Tel. 0760932183 e-mayl: ifil@linkopingmoske.se.

FIIRO GAAR AH!

Macluumaadka muhiimka ah waxaa lagu qorri doonaa websaydhka.

<http://www.linkopingmoske.se/>